

United Nations  Nations Unies  
Office for the Coordination of Humanitarian Affairs

**SANDUUQA DHEXE EE QARAMADA MIDOUBEY EE WAXQABASHADA DEGDEGGA AH OO \$10  
MILYAN OO LAGU XOOJINAYO BARNAAMIYADA GARGAARKA U QOONDEEYAY  
SOOMAAALIYA**

(Nayroobi: 9 Febraayo) – Xiriiriyaha Gargaarka Degdegga ah ee Qaramada Midoobey, John Holmes, ayaa u qoondeeyey ilaa \$10 milyan oo lagu xoojinayo waxqabadka bani'aadamnimada ee Soomaaliya halkaa oo sida lagu sheegey qiimeyntii ugu dambeysey ee Qaramada Midoobey, xaaladaha dhibaatooyinka bani'aadamnimadu ee dhinacyada ugu muhiimsan ay ka sii dareyaan.

10ka Milyan ee Doolar ee ka timid Sanduuqa Dhexe ee Waxqabashada Degdegga ah ayaa Madaxa Xafiiska Qaramada Midoobey ahna Xiriiriyaha Arrimaha Bani'aadamnimada uu u qaybin doonaa barnaamijyada muhiimka ah ee nafaha lagu badbaadinayo, oo ay ku jiraan biyaha iyo fayadhowrka, taageeridda nolol-raadsiga iyo maaliyad-siinta Adeegga Duulimaadyada Qaramada Midoobey ee UNHAS. Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo la-hawlgalayaashooda dhinaca bani'aadamnimada ayaa codsadey \$919 milyan oo ay ku taageeraan dadka u baahan ee ku nool Soomaaliya sanadka 2009ka. Laakiin ilaa hadda, keliya 18 boqolkiiba maaliyaddii la codsaday ayaa la heley.

Xaaladda bani'aadamnimada ee Soomaaliya ayaa liidata hadda, waana ay sii xumaaneysaa. Afar xilli oo is xiga oo roob yaraani jirtey, iskahorimaadyo socda, barokac baahsan iyo sicir barar aad u badan ayaa si aad u weyn u sii xumeeyey xaaladaha bani'aadamnimada, taas oo keentey in ay aad u sii badato nisbada nafaqo-xumada ee badi koonfurta/bartamaha dalka taas oo hadda aad uga sarreysa nisbadii ugu hooseysa marka ay xaaladaha degdegga ahi jiraan oo ah 15 boqolkiiba. Dadka gudaha ku barokacaya ayaa sii badanaya iyada oo 1.1 milyan oo qof ay gudaha ku barokaceen ilaa 2007dii oo keliya, taas oo wadarta tirada dadka barokacay ka dhigtey 1.3 milyan.

Intaa waxaa dheer, ku dhowaad 476,000 oo Soomaali ah ayaa ka cararey dalka, taas oo saameyn weyn ku reebtey gobolka. Waxaa Kenya oo keliya jooga 230,000 oo qaxooti ah. Dalka Itoobiya, tusaale ahaan, oo qaxootiga Soomaalida ah ee soo gala ay yihiin 30,000, Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobey (UNHCR) ayaa ka furtey xeradii saddexaad ee qaxootiga bartamihii 2008da si loo dejiyo qaxootiga imanaya, halka xerada afaraadna la qorsheynayo in la furo 2009ka. Dalka Jabuuti, oo martigeliya 10,000 oo qaxooti ah, ayaa maaliyadda ay UNHCR heshey ay ahayd 15 boqolkiiba intii ay u baahneyd sanadka 2008. Waxa jira 5,000 oo Soomaali qaxooti ku ah Eritrea in kasta oo haddana aaney xuduud la lahayn Soomaaliya. Ugu dambeyntii, 30,000 oo qaxooti Soomaali ah ayaa galay Yaman ilaa 2007dii, sanadkii 2008dana in ka badan 50,000 oo qof ayaa isku dayey in ay ka gudbaan badda gacanka, kuwaas oo badi ay ku dhinteen isku daygaas.

Maaliyadda Sanduuqa Dhexe ee Waxqabadka Degdegga ah uu u qoondeeyey Soomaaliya waxa ay qayb ka tahay \$75 milyan oo uu qoondeeyey Xiriiriyaha Qaramada Midoobey ee Gargaarka Degdegga ah taas oo loogu talagalay in lagu taageero barnaamijyada xaaladaha degdegga ah ee ka jira adduunka oo dhan ee aan haysan maaliyad ku filan. Qoondoyntan oo sanadkiiba laba jeer la sameeyo waxaa lagu saleeyaa degdegta baahida bani'aadamnimo, oo ay la socoto lafagur lagu sameeyo ilaa heerka la maalgeliyey barnaamijyada bani'aadamnimada.

Sanduuqa Dhexe ee Waxqabadka Degdegga ah waxaa la aasaasey 2006dii si uu hay'adaha uga gargaaro in ay si degdeg ah wax uga qabtaan xaaladaha bani'aadamnimada ee cusub iyo kuwa sii xumaanaya. Ilaa iyo intii la aasaasey sanduuqa, in ka badan 100 Dal oo xubno ka ah iyo deeq-bixiyeyaal ganacsi gaar ah ayaa u qaraamey 1.5 bilyan oo doollar.

*Wixii xog dheeri ah, fadlan la soo xiriir: Stephanie Bunker, OCHA-New York, +1 917 367 5126, mobile +1917 892 1679, [bunker@un.org](mailto:bunker@un.org); Nicholas Reader +1 212 963 4961, mobile +1 646 752 3117, [reader@un.org](mailto:reader@un.org), John Nyaga, OCHA-NY, +1 917 367 9262, [nyagaj@un.org](mailto:nyagaj@un.org); Elisabeth Byrs OCHA Geneva, +41 22 917 2653, mobile, +41 79 473 4570, [byrs@un.org](mailto:byrs@un.org)*  
war saxaafadeeddada OCHA waxaa laga helaa <http://ochaonline.un.org> ama [www.reliefweb.int](http://www.reliefweb.int). Xog dheeri ah oo ku saabsan Sanduuqa Dhexe ee Waxqabadka Degdegga ah (CERF), fadlan booqo <http://cerf.un.org>